

# TALAABADAHA ARJIGA MAALIYADDA KAALMADA KIRADA (DAGGANEYAASHA)

## TALAABADA 1AAD

Arjiilaha wuxuu internetka ka buuxiyaa arjiga RRF, kana mid ah:

- Koobi saxiixan oo ku saabsan kirada ama heshiiska dagganaha
- Warqadaha sawirka ee loogu talagalay madaxa reerka
- Macluumaadka lagala xariiro milkiilaha hantida/maamulaha hantida
- Warqadaha manaafacaadka shaqo la'aanta (haddii lagu dabaqi karo)

**Koobiga heshiisyada dagganaha waxaa laga heli karaa [bogga internetka RRF](#).**

**Tilmaamaha ku saabsan sida loo adeegsado telefoonka, loona soo geliyo warqadaha, riix [halkaan](#).**

Arjiga, dagganeyaasha waxay codsan karaan in loo soo diro fariin qoran si loola socodsiiyo wararkii ugu dambeyay.

## TALAABADA 2AAD

Waa la baaraa arjiga si loo ogaado xaq u yeelashada. U qalmi la'aanta waxaa ka mid ah:

- Arjiilaha ma aha kireyste daggan Magaalada Boston
- Arjiilaha waa arday waqti buuxa
- Arjiilaha wuxuu qaataa fojarka ku saleysan mashruuca ama fojarka lala dhaqaaqo.
- Arjiilaha wuxuu ka sareyaa 80% AMI

*Dagganeyaasha waxay racfaanka ku qaadan karaan email: [RRF@boston.gov](mailto:RRF@boston.gov)*

## TALAABADA 3AAD

Arjiyada waxaa loo fiirin doonaa haddii ay dhamaystiran yahiin Arjiilaha waxaa la ogeysiin doonaa warqadaha ka maqan lifaaqyada.

## TALAABADA 4AAD

Arjiyada la dhamaystiray waxaa loo diri doonaa wakaaladaha iskaashiga. Wakaaladaha iskaashiga waxay codsan doonaan warqado dheeraad ah oo laga soo qaado maamulaha hantida/milkiilaha hantida. Kaddibna, wakaaladda iskaashiga waxay bixin doontaa maaliyadda.

## TALAABADA 5AAD

Bixinta kaalmada kirada waxaa toos loo siin doonaa maamulaha hantida/milkiilaha hantida. Dagganeyaasha waxay heli doonaan xaqiijinta kaalmada iyo koobi ku saabsan heshiiska milkiilaha oo saxiixan.